

# Isbeddelka Qalabka ALPR ee Ilaalada

## Waaxda Booliska Seattle (SPD)

### Waa maxay tiknoolajiyadda?

Akhriyayaasha Taargada Gaariga ee Ootamaatigaa (ALPR) waa iskudarka barnaamij (software) iyo qalabkeeda oo loo isticmaalo qabashada iyo la-socoshada sawirrada taarikada gawaarida.

SPD waxay isticmaashaa ALPR si ay u ilaaliso nabadgelyada dadweynaha iyo sharcifulinta shariyada khuseeya ee la xiriira gawaarida la xaday, sharcifulinta gaari-dhigashada, iyo baaritaannada kale ee socda.

2021 dhexdeeda, Golaha Magaalada Seattle wuxuu oggolaaday Sharci-maxaliga 126312, ayadoo la ansixiyay isticmaalka tiknoolajiyadda ALPR ee SPD oo lagu xiray 8 gaari SPD oo kuwa ilaalada ah.

Muddada faallo-bixinta tiknoolajiyaddaan hadda wey furantahay. Wuxaa ka bixin kartaa faallada:

[Seattle.gov/SurveillanceComment](https://www.seattle.gov/SurveillanceComment).

Kulli faallooyinka waxaa lagu dari doonaa Warbixinta Saameeynta La-socoshada ee tiknoolajiyaddaan waxaana loo gudbin doonaa Golaha.

Hadaad jeceshahay inaad ku bixiso jawaab-celin waqtii ka baxsan muddada faallo-bixinta, fadlan toos ugu gudbi Golaha Magaalada.

### Waa maxay isbeddelka qalabka la codsaday?

- Dhammaan gawaarida SPD ee leh fiidiyowga gaariga shirkiisa ku jira waxaa lagu rakibi doonaa barnaamijka ALPR oo ku shaqeyn doona barnaamijkii horey u jiray ee fiidiyowga gaariga ku jira.
- Dhammaan sargaallada SPD ee dhaarsan waxaa lagu tababari doonaa isticmaalka fiidiyowga gaariga ku jira ee barnaamijka ku shaqeyya ALPR.
- Nidaamka xaafiiska dambe kaasoo lagu turjumo xogta kaamirada ALPR islamarkaasna lagu maamulo ALPR wuxuu ka guuri doonaa barnaamijka Neology Pips oo loo beddeli doonaa barnaamijka la ballaariyay ee Axon Fleet Hub.

### Maxaa isbeddeli doonin?

- **Wax isbeddel ah laguma sameyn dooo haynta xogta.** Dhammaan xogta lagu aruuriyo nidaamyada ALPR – sawirrada, lambarrada taargada gawaarida ee kumbuyutarku turjumay, taariikhda, waqtiga, goobta GPS-ka – waxaa la keydiyaa oo la hayaa muddo 90 maalmood ah. 90 maalmood kadib, dhammaan xogta nidaamyada ALPR lagu aruuriyay iskeed bey isku tirtiri doontaa ilaa loo keydiyo sida uga shaqeynta ujeedo baaritaan mooyaane – markay taas jirtana, waxaa lagu dari doonaa gal baaritaan.